

Farrintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 24, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xirmada COVID-19 oo loogu talagalay dadka naafada ah



Muuqaal sawir oo ka socda mid ka mid ah sheekooyinka bulshada.

Xirmada COVID-19 ee loogu talagalay dadka naafada ah ayaa hadda laga helayaa [bogga internet-ka ee Ilaha Bulshada ee OHA](#).

Xirmada waxaa ku jira [Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo](#) oo cusub oo ay la socdaan macluumaad u gaar ah dadka naafada ah. Su'aalaha guud waxaa ka mid ah isdhexgalka daawada, waxa la sameynayo arrimaha la xiriira helitaanka/gelitaanka xarumaha caafimaadka, xaaladaha caafimaad ee nidaamka difaaca jirku liito iyo kuwo kale oo badan.

Waxaa sidoo kale jira laba skeeko oo bulsho, mid ku saabsan [Sababta Loo Qaato Tallaalka COVID-19](#) iyo mid kale oo ku saabsan waxa la filayo marka [Aad Qaadanayso Tallaalkaaga COVID-19](#).

Sheekooyinka bulshadu waa tilmaamaha dhanka muuqaalka oo kuu horseeda macluumaad muhiim ah. Waxaa asal ahaan loo abuuray in ay noqdaan hab looga caawinayo dadka qaba autism-ku in ay fahmaan xaaladaha bulsho, ula qabsadaan isbeddelka una ogaadan waxa laga filayo dhacdo ama nidaam. Si kastaba ahaatee, isticmaalka sheekooyinka bulshada ayaa la ballaariyay waxayna caawin karaan dad kasta oo ah kuwo aragti ahaan wax ku barta ama u baahan in ay fahmaan nidaam tallaabo-tallaabo wax loo raacayo.

Waxaa sidoo kale jira fiidiyowiyada ASL, kaararka wada xiriirka iyo ilo kale oo badan oo ku jira xirmada.

Kani wuxuu ahaa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya daneenayaasha ee dhanka naafanimada bulshada, Maamulka Caafimaadka Oregon, Kooxda Ka Jawaabida iyo Ka soo kabashada COVID iyo Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS).

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.